# WASAARADAHA JSL

## ISTICMAALKA BARAHA BULSHADA

**Hor-dhac**

Xiligan Casriga ah ee ay Dunidu u guurtay Digital-ka wax walba waxa laga eegaa Internetka sida; Baraha bulshada ee ay ugu horeeyaan Twitter (X), iyo Facebook iyadoo si gaar ah documentiyada loogu daabaco Shabakadaha (Websites), kaasi oo ay Hay'ad kastaa leedahay waqtigan Casriga ah lagana heli karo dhamaan Xogta ku saabsan iyo dhaq-dhaqaaqyada ka socda ee ay muhiim tahay in la ogaado ama Bulshada loo soo bandhigi karo (Public).

Xog-ururintani waxay soo koobaysaa waa sidee isticmaalka Baraha Bulshada ee Wasaaradaha Jamhuuriyadda Somaliland. Sida ay bulshadu ugu xidhan tahay iyo Macluumaadka lagu baahiyo iyo sidoo kale Macluumaadkaasi la baahiyey ma yahay mid si fudud loo fahmi karo ama mid xidhiidh la leh shaqada Wasaaradda Baahisay amase ka turjumaya baahida Bulshada gaar ah ee ay u adeegto wasaarad kastaaba, ma siinayaa xog ku filan oo ay go'aan ku gaadhi karaan ama ku wacyi galin kara ujeedooyinka iyo ahdaafta Wasaaradda?


Xidhiidhka ka dhexeeya qaybaha kala duwan ee baraha bulshada iyo siday isugu xidhanyihiin dhexdooda mid waliba uu kuugu tilmaami karo kan kale adigoo aan meelo kala duwan ka baadhin Website-ka, Tiwitter-ka, Facebook-ga iyo baraha kale ee bulshada.

Dokumentiyada laga heli karo Website-yada Wasaaradaha warbixintani waxay diiradda saaraysaa dukumentiyada ku jira; sida xeerarka, siyaasadaha, Istaraatijiyadda iyo Daraasado ama Xogo la soo ururiyey oo lagu ogaaday jiritaan ama la'aanta adeegyo ama baahiyo gaar ah. Waxa kale oo xog-ururintani ay soo bandhigaysaa luuqadaha ay ku qoran yihiin macluumaadka lagu baahiyo Mareegaha 24-ka Wasaaradood ee Somaliland.


### Isticmaalka Twitter

Sida ka muuqata Jaantuskan Wasaaradaha Somaliland waxay aad ugu liitaan dhinaca Twitter, iyadoo qaybtan aan ku eegayno sida ay Bulshadu ugu xidhan tahay ama ay ula socoto macluumaadka ay ku baahiyaan Twitterka. Waxa muuqata inaanay dad bani ku xidhnayn wasaaradaha isticmaala twitter-ka, qaarkoodna account kuma laha twitter-ka. Tirada dadka ugu badan ee la socda bogagga Twitter ee Wasaaradaha Somaliland waxay u dhaxaysaa 100 qof ilaa 9,000. Halka afar meelood meel ka mid ahi aanay lahayn ama aanay isticmaalin.

Ma jirto mid ka mid ah wasaaradaha Somaliland oo goggeeda Twitter ay ku xidhan yihiin dad gaadhaya 100 kun oo qof ama Hay'ado kale (100K Followers). Taasi waxay muujinaysaa sida ay Wasaaraduhu uga liitaan dhinaca barkulanka bulshada ee Twitter.





Dhianca xog tabinta ama macluumaadka ay la wadaagaan Bulshada marka loo eego Xog-Ururtan la sameeyey sanadkan 2023-ka waxaa muuqata in kala badh in ka badan (58%) aanay wax macluumaad ah ku baahin bishii ugu dambaysa laga bilaabo maalinta xog-ururinta la sameeyey, kuwaasi oo isugu jira 25% aan lahayn Bog Twitter ah iyo kuwo kale oo aan baxba ku baahin bartooda.





Waxa bishii ugu dambaysay Macluumaad ku baahiyey Boggooda Twitter 42% ka mid ah Wasaaradaha Somaliland sida ka muuqata Jaantuskan. Maadaama oo ay aad u yar yihiin dadka ku xidhan sidoo kale waxa aad u hoosee daawashada iyo akhrinta (views).

**Isticmaalka Facebook**

Sida uu muujinayo Jaantuska Xog-Ururtu Wasaaradaha Somaliland waxay ku fiican yihiin Xaga isticmaalka Facebook-ga Marka la barbar dhigo Twitterka. Dhinaca ku baahinta macluumaad joogto ah iyo tirade dadka ku xidhan labadaba. Bogagga Facebook ee Wasaaradaha Somaliland dadka ugu badan ee ku xidhan ama follow-gareeyey waxay u dhexeeyaan 1k-20k kuwaasi oo ah 54%, tirada ugu badan ee ku soo xigtaa waxay u dhaxaysaa 21k-40k oo 17% ah iyo 41k-60k oo 17% ah. Halka 61k-100k ay yihiin 8% kaliya. kaliya dad 100k ah ama ka badan waxay ku xidhan yihiin 4% ka mida Bogagga Facebook ee Wasaaradaha Somaliland.




Xagga baahinta Macluumaad Joogto ah Wasaaaraduhu waxay aad u adeegsadaan Bogga Facebook-ga, marka loo loo eego maalinta Xog-Ururinta la Sameeyey. 71% ka mid ah Bogagga waxa macluumaad lagu baahiyey isla maalintaasi. Halka 25% wax lagu baahiyey bishii ugu dambaysa, 4% kaliya ayaan waxba la galin seddexdii bilood ee la soo dhaafay. Taasi waxay muujinaysaa in dhaq-dhaqaaqa dhinaca Facebook ee Wasaaraduhu uu aad u sareeyo.




Hadaba su'aashu waxay tahay macluumaadka la baahiyey ma yahay mid si fudud loo fahmi karo ama mid xidhiidh la leh shaqada Wasaaradda Baahisay amase ka turjumaya baahida Bulshada gaar ah ee ay u adeegto wasaarad kastaaba, ma siinayaa xog ku filan oo ay go'aan ku gaadhi karaan ama ku wacyi galin kara ujeedooyinka iyo ahdaafta Wasaaradda?

**Macluumaadka lagu baahiyo Baraha Bulshada**

Xogta ay xambaarsan yihiin qoraalada, sawirada iyo muuqaalada ay Wasaaraduha Somaliland ku baahiyeen Boggooda Twitter-ku waxay u badanyihiin macluumaad aan la fahmi Karin ama ka baxsan mawduuca ay shaqadu ku saabsan tahay. Waa macluumaad aan faah-faahsanayn ama mid aad u dheer oo nuxur ahaan aan la fahmi Karin.

Xogta la baahiyey oo aan ka Jawaabayn baahiyaha asaasiga ah ee Bulshada ay Wasaaradu u xil saaran tahay iyo warbixinaha oo aan ka jawaabayn ujeedada loo baahinayo warbixinta

hadafka laga leeyhay ama lixda su'aalood ee asaasiga u ah marka macluumaad bulshada lala wadaagayo (5w&h).

Xogo aan xidhiidh lalahayn shaqada wasaarada sida Wasiirka oo siyaasiin kale u jawaabaya ama arrimo qabyaaladeed iyo siyaasadeed oo ka baxsan shaqada Wasaarada. Maadaama oo ay wasaaraduhu la shaqeeyaan Hay'ado Caalami ah, macluumaadka la baahiyey maaha mid sawir fiican ka bixinaya sumcada iyo adeeg-wanaaga wasaaradaha Somaliland.

**Isku xidhnaanta baraha kale ee Bulshada**


Dhinaca isku xidhnaan Baraha bulshada ay is ticmaalaan Wasaaraduhu waa sida ka muuqata Jaantuskan hoose. qiimaynta waxaan ku eegaynaa in hal meel laga wada helo karo adeega ay wasaaraddu bixiso ama midba midka kale kuu tilmaami karo. Qofka twitter-ka booqda ee doonaya inuu xog dheeraad ah ka sii baadho Website ka ama baraha kale ee bulshada, Miyuu si fudud u heli karaa inuu halkaa ka wada helo links-ka Website, Facebook-ga ama baraha kale ee bulshada?

Twitter-ka marka la joogo Jawaabtu waa maya; waayo 29% kaliya ayaa ku gaynaya website kooda. 71% ka soo hadhay waxay isugu jiraan 8% Facebook-gooda ku xidhan, 13% Website kale oo gaar ah ku xidhan, 25% aan melna ku xidhnayn iyo 25% aan lahaynba wax Twitter account ah. Sidaa awgeed Dadka ku xidhan twitterka waxaa ku adkaanaysa inay si fudud u tagaan website-ka ama Facebook-ga maadaama oo aanay isku xidhnayn badan koodu.

Facebook marka la joogo kala badh in ka badan (58.3%) Pages-ka Wasaaraduhu waxay toos ugu xidhan yihiin Website-ka, taasi waxay fududaynaysaa in dadka jooga Facebook ee aan aqoon badan u lahayn baadhista Mareegaha (Website) ay si fudud u tagi karaan Website-ka si ay uga raadiyaan macluumaad dheeri ah tusaale ahaan xeerarka, habraacyada iyo dukumeyntiyada kale ee muhiimka ah kuwaasi oo website ka hore loo galiyey.


Dhinaca kale, 25% ka mida Wasaaradaha Page-kooda Facebook kuma Xidhna Website-ka iyo Twitter, sidaa awgeed dadkaasi ma helayaan link ay sii raacaan si ay macluumaad dheeri ah uga baadhaan Website ka maadaama inta badan Xogta la galiyo Social media-ha kale ay fogaato ama ay adagtay in si fudud lagu soo helo xogta la galiyey sanado ka hor. 8.3% ka mid ahi waxay ku xidhan yihiin Website gaar ah, halka 4.2% ay toos ugu xidhan yihiin Twitter-ka oo kaliya halka ay 4.2% ay wadaagaan oo ay ku wada xidhan yihiin Twitter iyo Webite kuba.

Dhinaca website-yada, dhamaan Wasaaraduhu waxay leeyiihiin Website-yo ku xidhan portalka Dawlada Somaliland, kuwaasi oo 87% ku xidhan Page-kooda Facebook, Halka 13% aanay ku xidhnayn. Dhinaca isku xidhnaanta twitter-ka 54% waxay ku xidhan yihiin Twitter, halka 46% aanay ku xidhnayn wax twitter account ah.





### Isticmaalka Webisite-ka

Dhamaan Wasaaraduhu waxay leeyihiin Website-yo ku xidhan Portalka Dawladda, halka qaarkood ay leeyiin 2 Website kuwaasi oo leh mid ay si gaar ah u samaysteen. Dhinaca dhaq-dhaqaaqa Website-yada, jaantuskan waxaan ku eegaynaa sida looga shaqeeyo website yada ama wax loo galiyo, 50% ka mid shabakadaha Wasaaradaha Somaliland waxa macluumaad lagu baahiyo (Update) ugu damaysay sanadkii hore, marka laga bilaabo taariikhda xog ururintan la sameeyey.




Taasi waxay muujinaysaa in kalabadh ka mid ahi aanay websiteka macluumaad ku baahin sanadkii ugu dambeeyey. Halka kala badhka kale ay isugu jiraan sidan; 33% bishii ugu dambaysa macluumaad ku baahiyey, 8% bil ka hor ay ugu dambaysay iyo 8% oo ay ugu dambaysay 6 bilood ka hor macluumaad ay ku baahiyaan website kooda.

### Xogta lagu baahiyo Website ka




Maclumaadka lagu baahiyo Website-yada Wasaaradaha xogtu waxay shaaca ka qaaday dukumentiyada ku jira; sida xeerarka, siyaasadaha, Istaraatijiyadda iyo Daraasado ama Xogo la soo ururiyey oo lagu ogaaday jiritaan ama la'aanta adeegyo ama baahiyo gaar ah. Waxa kale oo xog-ururintani ay soo bandhigaysaa luuqadaha ay ku qoran yihiin macluumaadka lagu baahiyo Mareegaha 24-ka Wasaaradood ee Somaliland.

Wasaaradaha website-kooda laga lelay xeerarka ay ku aasaasanyihiin waxay noqdeen 33% kaliya, halka 67% percent ka kale aanay ku baahin. Taasi waxay muujinaysaa cidii u baahan inay ogaato xeerka wasaaradaasi inaanay ka heli Karin. Dhinaca kale 38% Wasaaradahu waxay baahiyeen Siyaasadda ay ku shaqeeyaan, halka 62% aan la heli Karin tani waxay noqon kartaa inaanay gabi ahaanba lahayn siyaasad ay ku shaqeeyaan ama inaanay meelna ku baahin.

Marka loo eego xog ururintan 46% ka mid ahi waxay leeyihiin istraatiyad ay ku shaqeeyaan taasi oo ay ku baahiyeen Website-yadooda, halka 54%-ka aanay baahin. Daraasado la sameeyey waxa laga helay 25% ka mid ah wasaaradaha, halka 75% aanay baahin marka loo eego xogta ku jirta Website-ka. Waxa kale oo xog-ururintan lagu eegay in xeer-hoosaadka laga heli karo website ka iyo in kale waxaana ay xog ururintu shaaca ka qaaday in 8% kaliya la heli karo halka 92% ka kale aan la heli Karin sida ka ka muuqata Jaantuskan sare.

Luuqadaha ay ku qoran yihiin Macluumaadka lagu baahiyo Website-ka, waxaa xog-ururinta lagu ogaaday in laba luuqadood ay isugu jiraan oo kala ah Ingiriisi iyo Soomaali, marka la eego dukumentiyada sida xeerar/siyaasadaha iyo wixii la mid ah iyo sidoo kale wararka iyo qoraalada kale sida maqaalada iyo warbixinada (reports).

Ma habaysna Dokumentiyada Website ka lagu baahiyey, meelaha qaar meeshii loogu talo galay siyaasada waxa ku jira Xeerarkii, meelaha qaarkoodna hal meel ayaa la isugu geeyey iyadoo meelihii kale ee loogu kala tala galay ay madhanyihiin. Dokumentiyada qaarkood waxa ku qoran magacyo qabyo ah. Tani waxay keenaysaa in lagu dawakho oo aan si fudud loo fahmi Karin akhrinta xogta ku jirta Website.

**Talo soo Jeedin**

Warbixinta ka soo baxday Xog-ururintu waxay soo jeedinaysaa in dib u habayn lagu sameeyo baraha xidhiidhka Bulshada ee Wasaaradaha Somaliland. Xiligan Casriga ah ee ay Dunidu u guurtay Digital-ka wax walba waxa laga eegaa Internetka sida; Baraha bulshada, iyadoo si gaar ah documentiyada looga baadho Shabakadaha (Websites) kaasi oo ay Hay'ad kastaa leedahay waqtigan Casriga ah lagana heli karo dhamaan Xogta ku saabsan iyo dhaq-dhaqaaqyada ka socda ee ay muhiimka tahay in la ogaado ama Bulshada loo soo bandhigi karo (Public).

1. Sidaa awgeed Warbixintu waxay soo jeedinaysaa in dib u habayn lagu sameeyo Baraha Bulshada ee Wasaaradaha Somaliland si looga heli karo wax kasta oo looga baahdo.
2. Kasbashada Follower badan oo dhanka Twitterka ah ama sida haatan loo yaqaano (X).
3. In twitter-ka lagu baahiyo Macluumaad Joogto ah sida Facebook-ga loogu haahiyo
4. In macluumaadka baraha bulshada lagu baahinayo laga dhigo mid ka turjumaya Ujeedada Wasaarada sidoo kalena laga saaro warbixinada aan xidhiidhka la lahayn.
5. In Macluumaadka la baahinayaa uu noqdo mid kooban, macno buuxa oo la fahmi karo leh tani waxay Meesha ka saaraysaa in Bulshadu ay ku Jawo Wareerto.
6. In dhamaan baraha Bulshada ee Wasaarad kasta hal meel laga wada heli karo ayna isku xidhanyihiin Tusaale ahaan marka mid la soo booqdo dhamaan kuwii kale aad ka sii dhex booqan karto.
7. In dokumentiyada muhiimka ah sida Xeerka, siyaasadda, Xog-ururin/Daraasado iyo dhamaan wixii la xidhiidha ee daahfuran la galiyo Website-ka.
8. In la kala saaro, la nidaamiyo mid walbana meeshii loogu talo galay la galiyo (category)